Elim HOUSING | Homes that change people's lives

# Warqadda Macluumaadka Midoowitaanka: Luulyo 2025

Warqadda Macluumaadka Midoowitaanka waxaa la bixiyaa iyadoo la socota warqadda uu soo diray Maamulaha Guud ee Elim, Paul Smith, waraaqdaas oo loogu talagalay dhammaan macaamiisha Elim si loogu dhawaaqo qorshaha midoowitaanka ee lala yeelanayo Places for People.

Waxaan rajeynaynaa in warqaddan macluumaadka ay kaa caawin doonto in aad hesho jawaabaha qaar ka mid ah su'aalaha aad qabto. Warqaddan waxaan ku bixin doonnaa macluumaadkii ugu dambeeyay ee la xiriira qorshaha midoowitaanka sida ku cad bogga mareegta ee Elim.

**Waa kuma Places for People?**

Places for People waa hay'ad bulsho oo ballaaran taas oo hormuud ka ah UK, oo diiradda saarta u adeegista bulshada, lehna 13,000 oo shaqaale ah, kuwaas oo abuura, maamula, kana taageera bixinta adeega taageero ee la siinaaya bulshooyinka kobcaya in ka badan 245,000 oo guri - oo ay ku jiraan 74,000 oo ah guriyaha kiradooda bulshada aay awoodi karto - iyagoo kaashanaya barnaamijka horumarinta guryaha ugu weyn ee waaxda, kana shaqeeya in ka badan 100 xarumaha madadaalada ama iska bashaalka, una adeegaya in ka badan hal milyan oo macaamiil ah. Sanadihii 2023-24, waxay abuureen qiimo dhimis oo ka badan £334 milyan oo loogu talagalay macaamiishooda iyo bulshadooda.

Booqo barta www.placesforpeople.co.uk si aad macluumaad dheeri ah u hesho.

**Sidee buu qorshaha midoowitaanka u saameyn doonaa Heshiiska Qandaraaskayga kirada ama Ijaarka?**

Shuruudaha heshiiska qandaraaskaaga kirada ama ijaarka ma beddelmi doonaan sabab la xiriirta qorshaha midoowitaanka. Waxaad heli doontaa isla xuquuqda sharciyeed iyo ilaalinta aad hadda haysato. Elim waxay sii ahaan doontaa mulkiilaha gurigaaga xitaa ka dib marka ay noqoto laan hoosaad ka tirsan Places for People. Maadaama aad tahay kireyste guri bulsho, xuquuqdaada sharciyeed iyo ilaalinta aad haysato ma beddelaayo midoowitaanka.

**Midoowitaanka ma saamayn doontaa kiradayda ama kharashka adeegga?**

Maya. Haddii Elim ay ku biirto Places for People oo ay noqoto laan hoosaad, tani saamayn kuma yeelan doonto kiradaada ama kharashka adeegga. Waxaan sii wadi doonnaa dib u eegista kharashaadka sannad kasta, si waafaqsan heshiiskaaga kirada ama ijaarka ee hadda socda.

**Midoowitaanku ma saamayn doonaa Faa'iidooyinkayga ama Xuquuqda aan leeyahay?**

Maya. Haddii Elim ay ku biirto Places for People oo ay noqoto laan hoosaad, tani saamayn kuma yeelan doonto Faa'iidooyinkaaga ama Xuquuqda aad leeyahay ee hadda socda.

**Midoowitaanka sidee ayuu u saameyn doonaa adeegyada aan helo?**

Dhammaan adeegyada guryaha, taageerada, iyo dayactirka ee Elim way sii socon doonaan sidii caadiga ahayd ee hore iyada oo wadahadallada midoowitaanka aay socdaan, iyo haddii qorshuhu hirgalo, inta Elim ay laan hoosaad ka tahay Places for People.

Dhammaan adeegyada sida kasoo warbixinta dayactirka, bixinta kirada iyo kharashaadka adeegyada, ama sheegida arrimaha ka yimaada hoygaaga ama kooxda taageerada hoyga,

waxaa sii wadi doona bixintooda shaqaalaha hadda jooga xafiisyada shaqaynya. Tani waxay ka caawin doontaa in dhammaan adeegyada iyo xiriirka naga dhexeeya macaamiisha ay si habsami leh u sii socdaan inta lagu jiro marxaladdan isbedelka.

Elim waxay sii wadi doontaa maalgelinta dhinaca badbaadada iyo dayactirka dhismayaasheenna, waxaana rajeyneynaa inaad sidoo kale arki doonto horumar ku yimaadda adeegyadan, iyadoo ay sabab u tahay kheyraadka dheeraadka ah ee laga heli doono midoowitaanka.

**Midoowitaanku ma keeni doonaa wax dhibaatooyin ah?**

Guddiga sare ee Elim iyo kooxda hoggaanka ayaa si taxaddar leh u eegay saamaynta suuragalka ah ee ka dhalani karto la midoowitaanka Places for People, si ay u hubiyaan in ay tahay talaabada saxda ah ee aay qaadayso Elim iyo dhammaan macaamiisheena.

Mudada ugu horreeysa, waxaan ognahay in geeddi-socodka midoowitaanka uu u baahan doono waqti iyo fiiro gaar ah oo ka timaadda shaqaalaha Elim. Tani mararka qaar waxay sababi doontaa in qaar ka mid ah shaqaalaha laga mashquuliyo maamulka ama taageeridda adeegyada hawlgalka ee joogtada ah. Waxaan si dhow ula socon doonnaa arrintan si aan u hubinno in heerarka adeega macaamiisha aanay hoos u dhicin inta lagu jiro muddadan.

Guud ahaan, waxaan aaminsanahay in qorshaha midoowitaanka ay faa’iido u yeelan doonto macaamiisha Elim iyo awoodda ururkeenna ee ah inaan sii wadno maalgelinta guryaha iyo adeegyada, kuwaas oo loogu talagalay macaamiisha hadda jira iyo kuwa mustaqbalka.

**Maxaa ku dhici doona shaqaalaha Elim?**

Shaqaalaha Elim wax isbeddel ah kuma imaan doono inta ay Elim laan hoosaad ka tahay Places for People. Maadaama ay Elim noqoneyso laan hoosaad, Places for People waxay yeelan doontaa kormeer guud oo aay ku sameeynayso maaliyadda Elim iyo sida aan u maamulno khataraha ururka. Guddiga sare iyo kooxda hoggaanka ayaa sii joogi doona xilalkooda, waxayna sii wadi doonaan taageeridda dhammaan shaqaalaha si loo hirgeliyo qorshaha ganacsi ee Elim.

**Maxaa dhici doona haddii qorshaha midoowitaanka lala yeelanayo Places for People uu dhicin?**

Waxaan rajeyneynaa in dhammaan wadahadallada lala leeyahay Places for People in ay si guul leh u sii socon doonaan bilaha soo socda. Si kastaba ha ahaatee, haddii qorshaha midoowitaanka ee lala yeelanayo Places for People ay dhicin, waxaa suuragal ah in Elim ay u baahato inay raadsato lamaane kale kaas oo aay la midoowayaan.

Hadii Elim ayan helin lamaane la midoowa, waxaa suuragal ah inaan tixgelinno iibinta guryo badan oo guryaha bulshada ah marka ay bannaanaadaan, si loo xoojiyo xaaladdeena maaliyadeed. Waxaan sidoo kale laga yaabaa inaan yareyno maalgelinta guryaha macaamiisheena, taasoo keeni karta hoos u dhac ku yimaada qanacsanaanta macaamiisha iyo, in waqti ka dib dhacdo, in tayada guryahooda uu ku yimaado hoos u dhac.

**Muddu intee le'eg ayuu midoowitaanku qaadan doonaa?**

Haddii wadahadallada hadda socda, wada-tashiyada lala yeelanaayo deggeneyaasha, iyo habraacyada sharciga ay u socdaan sida loo qorsheeyay, guddiyada Elim iyo Places for People ayaa go’aan ka gaari doona bilowga Oktoobar 2025 in Elim ay noqonayso laan

hoosaad ka tirsan Places for People. Kadibna, waxaan rajeynaynaa inaan ku biirno Places for People oo aan noqono laan hoosaad bisha Diseembar 2025.

Marka Elim ay noqoto laan hoosaad ka tirsan Places for People, labada urur waxay qorsheynayaan inay mustaqbalka si buuxda isu wareejiyaan una mideeyaan howlaha iyo adeegyada ay bixiyaan. Wareejinta iyo Midaynta waa marka hal urur uu ku biiro urur kale, oo aay markaas si wadajir ah uga shaqeeyaan hal magac iyo hal nidaam, iyagoo noqonaaya hal urur oo mideysan. Tani waxay qaadan doontaa muddo dheeraad ah oo u dhexeysa 12 ilaa 18 bilood si loo dhameystiro. Marka la dhammeystiro, Places for People ayaa beddeli doonta Elim oo noqon doonta mulkiilaha gurigaaga.

Wali go’aan lagama gaarin wareejinta iyo midaynta howlaha. Haddii Guddiga Elim uu go'aansado inuu sii wado howlaha wareejinta iyo midaynta, waan kugu so wargelin doonnaa waxaana bilaabi doonnaa la-tashi kale oo lala yeelanaayo macaamiisha. Guddigu wuxuu adeegsani doonaa aragtidaada laga helay la-tashiga macaamiisha si uu go’aan uga gaaro in la sii wadaayo wareejinta yo midaynta howlaha iyo in kale.

Qorshaha iyo la-tashiga kaliya ee hadda socda wuxuu ku saabsan yahay ku biirista aay Elim Housing Association ku biirayso Places for People iyada oo noqoneysa laan hoosaad.